

Su'aalaha Badanaa La Isweydiyo: Tallaabada Kordhinta Mushaharka – Mugga II

Tallaabada Dhimista Mushaharka

Fadlan ka akhri wax badan oo ku saabsan tallaabada kordhitaanka mushaharka ee ku qoran daabacaada ugu horreysa ee Su'aalaha Badanaa La Isweydiyo: Tallaabada Kordhinta Mushaharka ayaa halkan laga helaa:<https://bit.ly/ProviderSTEPSFAQ>

Shaqaalaha daryeelka guriga (HCWs), shaqaalaha taageerada gaarka ah (PSWs), iyo adeegeyaasha daryeelka gaarka ah (PCAs) waxay hadda helaan mushahar sare oo ah 2,000 saacadood kasta oo ay shaqeeyaan. Guud ahaan, adeeg-bixiyeyaasha waxaa lagu meeleeeyay tallaabo u dhiganta tirada saacadaha ee ay shaqeeyaan iyadoo la tiriyay saacadaha la shaqeeyay ilaa Janaayo 1, 2023. Tallaabo kasta waxay la mid tahay sicir mushahar oo ka duwan midka kale.

Mudada xigta ee dib u eegista waa Diseembar 31, 2024.

HCWs iyo PCAs: Mushaharada waxa la hagaajin doonaa maalinta ugu horreysa ee xilliga lacag-bixinta ee 1/12/25-1/25/25.

PSWs: Dhammaan mushaharada PSW waxay si toos ah ugu hagaajin doonaan si ay ula jaan qaadaan Miisaanka Tallaabada Mushaharka ee Heshiiska Gorgortanka Wadareed laga bilaabo muddada lacag-bixinta ee 1/16/25 -1/31/25. Koror kasta oo ku yimaada tallaabada PSW waxaa sidoo kale lagu dabbaqi doonaa laga bilaabo xilliga ugu horreeya ee xilliga lacag-bixinta 1/16/25 ilaa 1/31/25.

Waa maxay tallaabooyinka?

Lifaaqa A ee Heshiiska Gorgortanka Wadajirka ah ee 2023-2025 wuxuu leeyahay jadwal muujinaya tallaabooyinka.

Tallaabada	Saacadaha la shaqeeyay oo isku uruuray tan iyo Janaayo 1, 2023	Luulyo 1, 2024 Sicirka Saacadlaha	Janaayo 1, 2025 Sicirka Saacadlaha
1	0 iyo in ka yar 2000	\$19.50	\$20.00
2	2000 iyo in ka yar 4000	\$20.50	\$21.00
3	4000 iyo in ka yar 6000	\$21.50	\$22.00
4	6000 iyo in ka yar 8000	\$22.50	\$23.00
5	8000+	\$23.50	\$24.00

Saacado intee le'eg ayaa lagu xisaabtamayaa marka la eego tallaabooyinkan?

2,000 ee saacadood kasta oo la shaqeeyo waxaa loo xisaabin doonaa ka gudbida tallaabo kasta. Saacadaha shaqo ee dheeraadka ah lama xisaabiyo. Gelitaannada wakhtiga taariikhiga ah ee la soo gudbiyay kadib xilliga dib-u-fiirinta (12/31/24) tirada laguma dari karo ilaa xilliga xiga ee dib-u-fiirinta.

Haddii qof u shaqeeyo wax ka badan hal nooc oo bixiye ah (HCW, PSW, PCA), dhammaan saacadaha ay shaqeeyaan miyaa la isku wada daraa si loo go'aamiyo tallaabadooda?

Maya. Saacadaha la iskuma wada daro. Tani waxay la macno tahay, haddii shakhsigu uu HCW ahaan ku shaqeeyo 1,000 saacadood iyo 1,000 saacadood PSW ahaan (ama PCA), waxay weli u qalmaan oo keliya tallaabada ugu horreysa.

Hase yeeshee, haddii adeeg-bixiyuhu uu ka shaqeeyo barnaamijyo kala duwan, waxay heli doonaan mushaharka ugu sarreeya ee nooc kasta oo bixiye ah (lambar bixiyaha) oo ku salaysan saacadaha caadiga ah ee la shaqeeyay marka dib loo eego ilaa Janaayo 1, 2023. Tusaale ahaan, haddii uu qofku yahay HCW oo uu shaqeeyay 1,900 saacadood laga soo bilaabo Janaayo 1, laakiin PSW ahaan (ama PCA), uu shaqeeyay 2,020, waxaa loo wareejin doonaa tallaabada 2aad.

Waxaan ahay PSW waxaana leeyahay kala duwanaansho. Waa maxay sababta Tallaabadayda ku jirto eXPRS u muujinaysaa caddad hoose? Mushaharkayga miyuu hoos u dhacay?

Tallaabadayda ku jirto eXPRS waxay muujinaysaa oo kaliya tallaabada hadda socota iyo heerka u dhigma tallaabadaas (ka tixraac [Daba-darka A ee heshiiska gorgortanka wadareed](#)). Si aad u aragto sicirka mushaharka ee ku aadan adeegga oo ay ku jiraan kala duwanaanta, qaado tallaabooyinkan:

1. Gal eXPRS.
2. Shaashadda guriga, guji **Find SPA (Raadi SPA)** ee liiska gacanta bidix.
3. Geli shuruudaha raadinta si aad ugu noqoto Adeegga Oggolaanshaha Hore (SPA) ee hadda aad rabto inaad ka ogaato sicirka.
4. Guji **Find (Raadi)**.
5. Guji gujoraaca sare ee aqoonsiga SPA.
6. Guji cinwaanka **Rates (Sicirada)** ee u dhow qaybta hoose ee bogga.
7. Eeg dhammaan kala-duwanaanshayaasha quseeya sicirka iyo wadarta guud ee caddadka.

Muxuu sameeyaa adeeg-bixiyaha hadduu diido tallaabada loo qoondeeyay?

Adeeg-bixiyeyaasha diidan halka lagaga meeleyay heerarka tallaabooyinka waxay kala xiriiri karaan Xarunta Caawinta Xubinta ee SEIU lambarka 1-844-503-7348 si ay u gudbiyaan cabasho ama tabasho. Waxay sidoo kale la xiriiri karaan qaybta xiriirada macmiilka ee OHCC ama waxay mareegta OHCC ku soo gudbin karaan foomka arrinta lacagta-bixinta (fadlan hoos ka eeg qaybta Kheyraadyada).

Khayraadka/Ilaaha

Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon Waaxda Xiriirka Macmiilka

Telefoonka: 1-877-624-6080

limaylka: OHCC.CustomerRelations@odhs.oregon.gov

Foomka Codsiga ee Waaxda Xiriirka Macmiilka:

<https://www.oregon.gov/odhs/providers-partners/homecare-workforce/Pages/default.aspx>

Xarunta Caawinta Xubinta ee SEIU

Telefoonka: 1-844-503-7348

limaylka: contact@seiu503.org